

***Extracts of Speeches by the Chairman of the SNM Central Committee and the Chairman of SNM confirming the Declaration of Somaliland's Re-assertion of its sovereignty as an Independent nation on 18 May 1991. In 1960, Somaliland was the independent "State of Somaliland" and, as from 18 May 1991, it became the "Republic of Somaliland"***

***The extracts have been quoted in various sources including, Haatuf newspaper. The contents of Ibrahim Meygag's speech are reproduced below, as reported, but are arranged in a clearer preamble format setting out the Resolution passed by both the SNM and the Grand Conference of the Somaliland Communities on that historic day. The preamble sets out the succinctly the reasons that led to the adoption of the resolution.***

**[www.somalilandlaw.com](http://www.somalilandlaw.com)**

---

**Gudoomiyaha Golaha Dhexe Ibraahim Meygaag Samatar:  
18 May 1991**

"Galabta Golaha Dhexe ee SNM waxa uu go'aansaday inuu taloyinkii ka soo baxay shirweynihii beelaha waqooyi inuu dhamaantood sidooda ku aqbalo waxaanay arintaasi ku saabsantahay:

**Markii la eegay:** taariikh dheer oo soo maray gobolada waqooyi,

**Markii la eegay:** halgankii dheeraa ee ay u soo galeen gobanimadooda inay helaan oo calankooda taagaan kana xoroobaan gumaysigii shisheeyaha,

**Markii la eegay:** hilawgii ay u hiloobeen inay la midoobaan walaalahoodii kale ee iyagana uu gumaysigu haystay oo ay la wadaagaan gobanimadooda,

**Markii la eegay:** taariikhdi dheerayd ee la soo maray iyo hungawgii arintaa ka raacay,

**Markii la eegay:** in waqooyigu waligii dulmanaa hadana marna aanu raali ka noqon dulmigaa,

**Markii la eegay:** dadku markuu is yidhi xaq ku dhawaaq oo ay yidhaahdeen ummaddu ha sinaatoo waqooyi iyo meel walba ee la maqli waayey;

**Iyada oo:** arinta uu sii dhooqeeeyey melatarigii xukunka qabsaday,

**Iyada oo:** la ogyahay halkay arintu gaadhay magaaloojin dumay, 150 sanno wixii ay ummaddu dhisaysay ay baaba'een, diyaarad magaaladii ay ka kacday duqaysay, xoolo la boobay, dad la xasuuqay, dumar la kufsaday, dhiidhigii ay dadku ka dhiidhiyeen ee ay halgameen, gobanimadoodiina dib u soo ceshadeen,

Waxaas oo dhan markii la isku soo duuduubey,

**Dadweynaha waqooyiga ku dhaqani waxay garteen inay xaqtahay oo ay mudantahay inay dawladooda gaarka ah dhistaan, iyada oo uu ku raacay golaha dhexe ee SNM.**

Taasi waa mid ay xaq u lahaayeen oo ay markii horeba ay dhashadeen markii ay gumaysigii ay eryeen, israacii ay keeneena mid gabii ahaanba aan sharci lagu xaqijin buu ahaa, mid aan dadka afti laga qaadin buu ahaa markii afti laga qaadayna sannad dabadii 90% dadka gobolada waqooyi raali ka may noqon wixii ka danbeeyey-na af-duub ayaa lagu haystay.

Shacbiga halgamay xaqbay u leeyihii inay dawladooda gaarka ah dhistaan, koonfurna dad Soomaaliyeed oo taliskii faashiga ahaa ee Siyaad Barre uu dulmaayey baa jira iygana lidi kuma aha dawlada gaarka ah ee waqooyiga dhistay jaar ah oo walaalo ah oo is aqoonsada inaanu noqono ayaanu ugu baaqaynaa.”

**Gudoomiyihii ururka SNM C/raxmaan Axmed Cali (C/raxmaan Tuur) waxaanu hadalkiisii ku bilaabay:**

““Sidaa uu iduin sheegay mujaahid: Ibraahim Meygaag Samatar **galabta oo Burco la Joogo waxa uu golaha dhexe ee SNM go'aansaday in waqooyigu gooni isu taago oo uu samaysto dawlada madax banan, taasina ma aha wax ku kooban golaha dhexe ee waxa uu ka turjumaya dareenka dadka ku nool waqooyiga waana la socoteen shirkii u socoday dadka waqooyiga, ummaddii way shirtay waxaanay gaadheen talooyin waaweyn golaha dhexe**

**ee SNM wuxuu isku raacay in waqooyigu gooni isu taago** taas macnaheedu maha in colaad cadaadaw iyo calool xumo ay jirayso koonfur iyo waqooyi, waxaanu anagu diyaar u nahay maamulka golaha dhexe iyo ummadda waqooyiga ku nool in walaalahayaga koonfureed inaanu la yeelano cilaaqad wanaagsan oo walaaltinimo ah oo wax tar leh oo danahooda guud ahaaneed kawada hadli kara, anaga oo ah laba dal oo labaduba madaxbanaan-yihii iyada oo ay dantu ku kalifayso inay wax badan iska kaashadaan iyaga iyo dawladaha kale ee aanu jaarka nahayba sidaas ayaanu anagu jecelnahay waxaanuna ka rajaynaynaa walaalahayaga koonfurta inay iyaguna sidaa u arki doonaan taas oo aan iyagana waxa dhibaato ah u lahayn, waxaan ilahay ka rajaynayaa in uu go'aankani noqdo mid waara"

(Sources: various ,)